

# Baarista sambabbada

Bronkoskopi



Lovisenberg Diakonale Sykehus

Lovisenberg Diakonale Sykehus  
Medisinsk poliklinikk  
Lovisenberggt. 17  
Telefon: 2322 5720

Bronkoskopi 01-2020 somali



Lovisenberg Diakonale Sykehus

HUBI!

Si fiican u akhri warbixinta  
u-diyaargaroobidda baarista

## **Waa maxay Bronkoskopi?**

Bronkoskopi waa baarista jirrada sambabbada. Tuubbo dhuubar oo dabacsan ayaa la geliyaa sanka ama afka. Baaristaan waxaa lagu heli karaa jirrooyinka hawo-mareenka iyo sambabbada ayadoo la qaadayo tijaabooyin kala duwan haddii loo baahdo.

### **Diyaargarowga baarista**

Waa inaad soontid laga bilaabo saacadda 24:00 (habeen-barka) habeenka ka horreeya baarista, taas micneheedu waxaa weeye inaadan wax cunin, wax cabbin, xanjo calashan, tubaako ruugin sigaarna cabbin/dhuuqin.

### **Dawooyin iyo jirrooyin kale**

- Waa inaad na siisaa wixii warbixina oo ku saabsan dawooyin aadan u adkaysan karin, iyo jirrooyin aad qabtid sida xanuunka wadnaha marka dhiiggu ka hakado (angina pectoris), cillad wadnaha ah, dhibaatootin dhiig-bax, maadaama ay taasi saamayn ku yeelan karto doorashada sida hawsha loo qabanayo.
- Haddii aad qabtid jirrooyinka wadnaha iyo halbowlayaasha oo kordhin kara khatarta caabuqista wadnaha (tusaale: in lagaa qalay waalka wadnaha/khalad waalka ku jira) waa inaad nasoo wacdid waayo waxaa dhici karta in lagu siiyo dawada antibiyootigga intaan lagu baarin.

### **Dawooyin saameeyaa muddada dhiig-baxa:**

- Haddii aad isticmaashid dawooinka dhiigga jilciya sida **Xarelto, Pradaxa, Eliquis** ama **Albyl-E** waa inaad joojisid qaadasha dawadaas 2 maalmood ka hor baarista.
- Haddii aad isticmaashid **Marevan**, waa inaad joojisid 3 maalmood ka hor baarista iyadoo xinjiroobistana (INR) lagu koontaroolayo shayaarkayaga. Sidaa awgeed waa inaad timaaddaa ugu yaraan 1 saac ka hor baarista adigoo farriintaan ka sheegaya daaqadda qaabilaadda ee Rugta caafimaadka – daaweynta bukaan-socodka (medisinsk poliklinikk)

- **Haddii lagu geliyey qalabka waalka wadnaha, waa inaadan joojin isticmaalka dawada Marevan**, laakiin aad la xiriirtid xarunta bukaan-socodka si xaaladdaada loo qiimeeyo.

### **Baarista laftigeeda**

- Waxaannu ku siinaynaa dharka isbitaalka lagu joogo.
- Waxaa lagugu jiifinayaa sariir jidhkaaga kor loosoo qaadayo.
- Wixii ilko ah ee kuwa layska saaro ah waa la saarayaa.
- Waxaa lagu siinayaa dawo qufaca kaa yaraynaya iyo mid ku dejinaysa.
- Baaristu xanuun maaha, laakiin dadka qaar baa ilaa xad qufaca.
- Tijaabooyin kala duwan ayaa la qaadaa inta baaristu socoto, taasoo ku xiran wixii la helo (nude/cad-yar oo lasoo gooyo ama tijaabo bakteeriyo baaris ah).
- Baaristu waxay socotaa 10-20 daqiqadood.

### **Baarista kadib**

- Dawada dejinta awgeed waa inaad sii jiiftaa oo nasataa dhawr saac baarista ka bacdi.
- Waa inaadan wax cunin waxna cabin ilaa ay kasoo wareegto 3 saac baarista (waayo waxaa lagaa kabuubyeeyey dalqada).
- Waa inaadan baabuur kaxayn 24-ka saac ee ku xigta.
- Dhakhtarkii kusoo diray ayaa loo sheegayaa natijjada baarista isla marka jawaabtu soo baxdo.
- Haddii loo baahdo waa lagu siinayaa caddayn qoraala inaad timid baarista sambabbada, laakiin dhakhtarka isbitaalku ma qorayo warqad jirro.

### **Dhibaatooyin**

- Aad bay u yar tahay in dhibi ka dhalato baarista sambabbada
- Mararka qaarkood qofku wuxuu qufaca xab dhiig leh tijaabooyinka la qaaday dartood, taasi waa wax degdeg u joogsada.
- Haddii xaaladdaadu xumaato markaad guriga tagtid kadib, lasoo xiriir dhakhtarka heeganka ee waaxda caafimaadka guud, telefoon 23 22 50 00.